

Wararka Aasaasiga ah ee

# Kaalmada Maaliyadda

(Financial Aid)



Horudhac ku saabsan Bixinta  
Kharashka Jaamacadda  
2011-2012

MINNESOTA  
OFFICE OF  
HIGHER  
EDUCATION

*reach higher*

# Sidee Ayaan u Bixiyaa Kharashka Jaamacadda?

Haddii ay kula tahay in aadan awoodin in aad tagtid jaamacadda, mar kale fikir. Kaalmada maaliyadda waxay kaalmeysay ardada si ay isaga bixiyaan kharashka waxbarashada ka dambeeyo dugsigga sare. Arday badan ayaa la yaaban in la siin karo kaalmo.



# Sidee baan ku

## **dalbadaa kaalmada maaliyadda?**

Ma dhib badna in la dalbado. Marka aad soo gudbisid hal foomka arjiga, waxaad ogaan kartaa haddii lagu ogol yahay dhowr ka mid ah kaalmada maaliyadda ee laga bixiyo kulliyadaha, jaamacadaha iyo dusgiyada shaqada.

Si aad u soo dalbatid kaalmada maaliyadda, waa in aad soo buuxisid Arjiga Kaalmada Ardayga Federaalka ee Lacag La'aanta ah (Free Application for Federal Student Aid, FAFSA). Foomka waxaa horaanta qaboobaha laga helaa internetka [www.fafsa.gov](http://www.fafsa.gov) waxaana loo adeegsadaa in lagu dalbado Deeqda Gobolka Minnesota (Minnesota State Grant), Deeqda Federaalka Pell Grant (Federal Pell Grant), Deynta Stafford (Stafford Loan) iyo kaalmada maaliyadda toos looga helo jaamacadaha. Foomka wuxuu kaaga baahan yahay in aad soo gudbisid macluumaad ku saabsan dakhliga soo gala qoyskaada, hantida iyo xaaladda degganaashaha gobolka. Foomka FAFSA aad soo buuxisid waxaa la soo hor dhiggi doonaa dhammaan jaamacadaha aad xulatay.

Xafiisyada kaalmada maaliyadda ee ku yaal jaamacadaha aad adiga daneyneysid waa ilo wanaagsan oo laga helo warar ku saabsan sida leyskaga bixiyo kharashka jaamacadda. Inta badan lacagaha kaalmada maaliyadda, meesha ay doonaan ha ka yimadaan, waxaa laga heli karaa jaamacadda aad ku talo jirtid in aad wax ka baratid. Kharash kuma baxo dalabka kaalmada maaliyadda. Marka aad dalbatid, ma aha in aad ballan qaadeysid in aad tageysid dugsi kasta.

Booqo [www.getreadyforcollege.org/paying](http://www.getreadyforcollege.org/paying) si aad wax uga ogaatid fursadahaaga kaalmada maaliyadda la heli karo.

# Affar Tallaabo Aasaas u ah in Lagu Dalabado Kaalmada Maaliyadda

1. Dalbo in lagu oggolaado in aad gashid hal jaamacad ama ka badan.
2. Kaalmada maaliyadda ka dalbo bogga internetka [www.fafsa.gov](http://www.fafsa.gov) adiga oo adeegsada Arjiga Kaalmada Ardayga Federaalka ee Lacag La'aanta ah (Free Application for Federal Student Aid) 1da Janaayo kaddib.
3. Dalbo deeqda waxbarashada laga bixiyo jaamacadaha. Weydiiso arjiga ama ka raadso internetka. Fiirso bogagga internetka lacag la'aanta ah ee laga helo wararka deeqda waxbarashada sida [www.fastweb.com](http://www.fastweb.com) si aad u raadsatid deeqda gaarka.
4. Hel warqadaha oggolaashada jaamacadda (ku xiran waqtiyada kala duwan).
5. Hel warqadaha ka socda jaamacadaha ee soo qora in aad xaq u leedahay kaalmada maaliyadda (badanaa 1da Abriil ama kaddib, taasoo ku xiran marka aad soo gudbisay FAFSA).

## Maxay yahiin noocyada kaalmada maaliyadda la heli karo?

Kaalmada maaliyadda waxay ku yimadaan dhowr qaab:

1. Deeqda ku saleysan baahida ee laga helo dawladdaha ka jiro gobollada iyo federaalka taasoo aadan dib u bixin doonin;
2. Deynta laga qaato dawladda federaalka iyo gobolka ama bangiyada gaarka loo leeyahay waajibna tahay in gadaal laga bixiyo deynta iyo korsaarka marka aad ka tagtid jaamacadda;
3. Shaqooyinka ku saleysan waxbarashada, kuwa lagu qaato gudaha ama dibadda xerada, ee adiga kuu oggolaada in aad shaqeysatid lacag si aad isaga bixisid kharashka jaamacadda;
4. Isdhaafsiga waxbarashada ayaa yareeya kharashka waxbarashada ardayda Minnesota ee wax ka barata kulliyadaha dadweynaha iyo jaamacadaha ku yaal North Dakota, South Dakota, Wisconsin, Manitoba iyo hal jaamacad oo ku taala Iowa;
5. Deeqda iyo waxtarka waxbarashada la siiyo ardayda ku jirta xaaladaha khaaska ah iyo kartida. Tusaale ahaan waxaa ka mid ah kaalmada xanaanada caruurta; manafacaadka ciidamada; kaalmada abaalmarinta darajooyinka sare iyo guusha laga gaaro waxbarashada; ama deeqda ku saleysan isirka, jinsiyadda ama karti khaas ah ama xaaladda nololaha.

La xariir jaamacad kasta oo aad ku talo jirtid si aad u ogaatid kaalmada khaaska ah iyo deeqda la bixiyo.

# Xaggee ayaan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Xafiiska Tacliinta Sare Minnesota (Minnesota Office of Higher Education) wxaa laga bixiyaa ilo kala duwan oo laga helo bogga internetka [www.getreadyforcollege.org](http://www.getreadyforcollege.org). Halkaan, waxaad ka heli doontaa:

- Tilmaan la socoto macluumaad ku saabsan kaalmada maaliyadda Minnesota iyo federaalka
- Xisaabiye oo waalidka iyo ardayga ku kaalmeeyo warar guud ah oo ku saabsan noocyada kaalmada loo ogol yaha
- Arjiyada isdhaafsigu waxbarashada, macluumaad ku saabsan Qorshaha Keydka Jaamacadda Minnesota (Minnesota College Savings Plan) iyo barnaamijka deynta SELF Loan
- Macluumaad ku saabsan kulliyadaha, jaamacadaha, dugsiyada shaqada Minnesota waxaana ka mid ah macluumaadka lagala xariiro, barnaamijyada la bixiyo, kharashka waxbarashada iyo khidmadaha, bogagga internetka iyo nambarda FAFSA
- Macluumaadka ku saabsan dhimista canshuurta waxbarashada iyo manafaacaadka



# Maxuu yahay kharashka ku baxa jaamacadda?

Kharashka ku baxa waxbarashada waa ku kala duwan yahay jaamacad ka jaamacad. Kaalmada maaliyadda aad qaadatid ayaa sidoo kale kala duwan kuna xirnaan doonta kharashka ku baxa tagidda jaamacadda aad dooratid. Kharashka waxbarashada iyo khidmadaha waxaa sii dheer kharashka badanaa ku baxa qolka la jiipto iyo raashinka, buugaagta iyo kharashka kale. Waxaa xisaabta lagu daraa dhammaan kharashyadaan marka jaamacadda ay xisaabeysaa kaalmada maaliyadda lagu siiyo.

Isku celcelis ahaan, kharashka sannadeed ku baxa waxbarashada iyo ujrrooyinka ardayda daggan ee dhigata jaamacadaha Minnesota

<b>\$5,067</b>	<b>Kulliyadaha bulshada iyo farsamada</b>
<b>\$7,240</b>	<b>Jaamacadaha gobolka</b>
<b>\$12,902</b>	<b>Jaamacadda Minnesota</b>
<b>\$13,448</b>	<b>Dugsiyada shaqada ee gaarka loo leeyahay</b>
<b>\$31,932</b>	<b>Jaamacadaha iyo kulliyadaha gaarka loo leeyahay</b>

**Xasuu:** Isku celceliska waa qiyaasta sannadaha 2011-2012. Kharashka ku baxa waxbarashada iyo ujrrooyinka ugu dambeeyay ee hay'ad kasta waxaa laga heli karaa [www.getreadyforcollege.org/tuition](http://www.getreadyforcollege.org/tuition).

## Ma jiraan manafacaad la xariira canshuurta marka la tago kulliyada?

Haa. Manafacaadka canshuurta federaalka waxay wax ka kaalmeyn karaan in ay hoos u dhigaan kharashka ku baxa jaamacadda. Manafacaadka waxaa ka mid ah:

- **Dhimista Canshuurta Fursadda Mareykanka** (American Opportunity Tax Credit): Canshuurta sanadkii 2011, waxaa laga yaabaa in aad dalbatid in canshuurtaada federaalka laga dhimo ilaa \$2,500 halkii arday oo loo ogolaado.
- **Dhimista Canshuurta Waxbarashada Nolosh** (Lifetime Learning Tax Credit): Waxaa laga yaabaa in aad dalbatid dhimista canshuurta ilaa \$2,000 halkii qoys xagga kharashka waxbarashada iyo kharashyada la xariiro.
- **Dhimista Korsaaarka Deynta Ardayga** (Student Loan Interest Deduction): Waxaa dhici karto in adiga qof ahaan, xaaskaada ama dadka kale ee kugu tiirsan lagaa dhimo korsaaarka deynta ardayga. Dhimista ugu badan kama badan karto \$2,500
- **Kaalmada Waxbarashada uu Bixiyo Loo Shaqeeyaha** (Employer-paid Tuition Assistance): Qaar ka mid ah loo-shaqeeyayaasha waxay soo celiyaan kharashka waxbarashada iyo ujrrooyinka. Arday ahaan, waxaa dhici karto in aad sanad kasta loo-shaqeeyahaada ka qaadatid ilaa \$5,250 oo ah manafacaadka waxbarashada aan canshuurta laga qaadin. Guud ahaan, waa in aad canshuur ka bixisid xisaabta manafacaadka waxbarashada ee aad ka qaadatid loo-shaqeeyahaada marka xisaabta ka badato \$5,250 halkii sano.

Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan manafacaadka canshuurta federaalka, la tasho bogga internetka Adeegga Dakhliga Gudaha (Internal Revenue Service) ee laga helo [www.irs.gov](http://www.irs.gov) iyo fiiri daabacaadda #970 ama wac (800) 829-1040.

## **Ku Saabsan** Xafiiska Tacliinta Sare Minnesota (Minnesota Office of Higher Education)

Xafiiska Tacliinta Sare Minnesota (Minnesota Office of Higher Education) waa wakaalad ka tirsan gobolka lana siman heerka wasiirada taasoo ardayda siisa barnaamijyada kaalmada maaliyadda iyo macluumaad si loogu kaalmeyo in ay helaan waxbarashada ka dambeeyso dugsiga sare. Wakaaladda waxay u shaqeysaa sida guri laga maamulo xogta, baarista iyo lafo gurka ku saabsan isku qorista ka dambeeyso dugsiga sare, kaalmada maaliyadda, maaliyadda iyo saadaalinta.

Booqo [www.getreadyforcollege.org/paying](http://www.getreadyforcollege.org/paying)  
si aad in badan wax uga baratid sida loo bixiyo  
kharashka jaamacadda.

# Barnaamijyada Kaalmada Maaliyada

	BARNAAMIJKA	ARDAYDA WAXAY ARJI U QORTAAN	XISAABTA
<b>Barnaamijyada Deeqda iyo Hibada</b>	<b>Deeqda Gobolka Minnesota (Minnesota State Grant)</b>	Buuxi FAFSA ( <a href="http://www.fafsa.gov">www.fafsa.gov</a> ) muddo 30 maalin gudahooda ka hor inta aan la bilaabin xilliga	Isku celceliska xisaabta la qaato waa \$1,625
	<b>Deeqda Federaalka Pell (Federal Pell Grant)</b>	Buuxi FAFSA ( <a href="http://www.fafsa.gov">www.fafsa.gov</a> )	\$555 ilaa \$5,550 sanadkiiba
	<b>Deeqda Federaalka Dheeraadka ah (Federal Supplemental Grant)</b>	Buuxi FAFSA ( <a href="http://www.fafsa.gov">www.fafsa.gov</a> )	Ilaa \$4,000 halkii sano
	<b>Deeqda Xanaanada Caruurta Minnesota ee Dugsiga Sare Xigta (Minnesota Postsecondary Child Care Grant)</b>	Xafiiska kaalmada maaliyadda xerada kaddib marka la buuxiyo FAFSA ( <a href="http://www.fafsa.gov">www.fafsa.gov</a> )	Ilaa \$2,600 halkii cunug halkii sano haddii uu ku qoran yahay waqtiga buuxa
<b>Barnaamijyada Daraasadda Shaqada</b>	<b>Daraasadda Ku Xiran Shaqada Minnesota (Minnesota Work Study)</b>	Xafiiska kaalmada maaliyadda xerada kaddib marka la buuxiyo FAFSA ( <a href="http://www.fafsa.gov">www.fafsa.gov</a> )	Waxaa go'aan ka gaara hay'adda
	<b>Daraasadda Ku Xiran Shaqada Federaalka (Federal Work Study)</b>	Xafiiska kaalmada maaliyadda xerada kaddib marka la buuxiyo FAFSA ( <a href="http://www.fafsa.gov">www.fafsa.gov</a> )	Waxaa go'aan ka gaara hay'adda
<b>Barnaamijyada Deynta</b>	<b>Deynta Federaalka Stafford ee la siiyo Ardayga (Federal Stafford Student Loan)</b>	Buuxi FAFSA ( <a href="http://www.fafsa.gov">www.fafsa.gov</a> )	Ilaa \$5,500 halkii sano sannadka kowaad lana siiyo ardayda shahaadada affarta sano, \$6,500 halkii sano sannadka labaad lana siiyo ardayda shahaadada affarta sano iyo \$7,500 halkii sano lana siiyo ardayda shahaadada affarta sano ee ugu yaraan ku sugan xaaladda sanadka saddaxaad. Waxaa sareeyso heerka deynta la siiyo ardayda ku qoran shahaadada lixda sano, ardayda barata xirfadaha iyo kuwa madax banaan
	<b>Deynta Federaalka Perkins (Federal Perkins Loan)</b>	Xafiiska kaalmada maaliyadda xerada	Ilaa \$5,500 halkii sano ardayda shahaadada affarta sano ama \$8,000 halkii sano ardayda shahaadada lixda sano

## NOOCA LA SIIYO

## ARDAYDA U QALMAYSA

<p>Ku saleysan baahida maaliyadda iyo kharashka tegidda jaamacadda</p>	<p>Kuwa daggan ee ku qoran hay'adaha Minnesota kana qaata ugu yaraan saddax dhobic shahaadada affarta sano. Waa in uu ahaado arday ka qalinjebiyay dugsiga sare ama mid la mid ah ama jiro 17 sano ama ka badan, soo qaatay in ka yar affar sano oo jaamacad ah, yahay muwaadin u dhashay Mareykanka ama ahayn muwaadin balse u qalma iyo in uusan ku fashalin bixinta deynta ardayga ama lacagaha masruufka caruurta.</p>
<p>Ku xiran baahida dhaqaalaha</p>	<p>Shahaadada affarta jaamacadda. Waa in uu ahaado muwaadin u dhashay Mareykanka ama ahayn muwaadin balse u qalma, in uusan ku fashalin bixinta deynta federaalka iyo waa in aan lagu qaadin xakunka mukhadaraadka muddada uu qaato kaalmada federaalka. Labka waa in ay ka diiwaan gashan yahiiin Adeegga Ciidamada (Selective Service).</p>
<p>Ku xiran baahida dhaqaalaha</p>	<p>Ardayda ku qoran shahaadada affarta sano ugu yaraan waqtiga barkiis. Waa in uu ahaado muwaadin u dhashay Mareykanka ama ahayn muwaadin balse u qalma. Labka waa in ay ka diiwaan gashan yahiiin Adeegga Ciidamada (Selective Service). Waxaa la soo hormariyaa kuwa qaata deeqda Pell Grant.</p>
<p>Ku xiran baahida dhaqaalaha, tirada qoyska iyo tirada caruurta</p>	<p>Kuwa daggan Minnesota ee haysta caruur da'dooda tahay 12 sano ama ka yar, ama 14 sano ama ka yar balse naafo ah. Ardayga waa in uu ugu yaraan lex dhobic ka qaato barnaamijka jaamacadda shahaadada hoose kana qaato hay'ad ku taal Minnesota oo la ogol yahay iyo waa in uusan qaadanin manafacaadka Qorshaha Maalgelinta Qoyska Minnesota (Minnesota Family Investment Plan). Waa in uu ahaado muwaadin u dhashay Mareykanka ama ahayn muwaadin balse u qalma.</p>
<p>Shaqada saacadaha yar sida ku saleysan baahida loo qabo maaliyadda</p>	<p>Kuwa daggan Minnesota ee ku qoran ugu yaraan lex dhobic halkii xilli. Waxaa ka mid ah ardayda qaadata shahaadada affarta sano, shahaadada lixda sano iyo kuwa qaata tababarka farsamada. Waa in uu ahaado muwaadin u dhashay Mareykanka ama ahayn muwaadin balse u qalma.</p>
<p>Shaqada saacadaha yar sida ku saleysan baahida loo qabo maaliyadda; ka xadidan barnaamijka gobolka</p>	<p>Ardayda qaadata shahaadada affarta sano, shahaadada lixda sano iyo tababarka farsamada. Waa in uu ahaado muwaadin u dhashay Mareykanka ama ahayn muwaadin balse u qalma. Labka waa in ay ka diiwaan gashan yahiiin Adeegga Ciidamada (Selective Service).</p>
<p>Deymaha <b>La Kabo</b> ee ku xiran baahida dhaqaalaha; dawladda waxay bixisaa korsaarka inta ardayga ku sugan yahay dugsiga, waa in dib laga bixiyo</p> <p><b>Aan La Kabin</b> Deynta Stafford waxaa heli kara ardayda aan qabin baahida dhaqaalaha; kuwa deynta qaata waxay bixiyaan korsaarka inta ay ku sugan yahiiin dugsiga, waa in dib laga bixiyo</p>	<p>Arday kasta oo ugu yaraan waqtiga barkiisa ku qoran dugsi la ogol yahay oo ku yaala Minnesota ama gobol kale shahaadada hoose jaamacadda, shahaadada dhexe jaamacadda, ardayda barata xirfadaha iyo tababarka farsamada. Waa in uu ahaado muwaadin u dhashay Mareykanka ama arday aan ahayn muwaadin balse loo ogol yahay mana ahaan karo arday ku fashalay bixinta ama lagu leeyahay deynta Cutubka IV Sharciga Waxbarashada Sare (Title IV Higher Education Act) ama deeq. Labka waa in ay ka diiwaan gashan yahiiin Adeegga Ciidamada (Selective Service).</p>
<p>Muddada dheer, deynta korsaarka yar sida ku saleysan baahida loo qabo maaliyadda, waa in aan dib loo bixiyo</p>	<p>Ardayda shahaadada affarta iyo lixda sano, waa in ay ahaadaan muwaadiniin u dhashay Mareykanka ama ahayn muwaadiniin balse u qalma, aan ku fashalin bixinta ama aan lagu lahayn lacagaha deynta Cutubka IV Sharciga Waxbarashada Sare (Title IV Higher Education Act) ama deeqda. Labka waa in ay ka diiwaan gashan yahiiin Adeegga Ciidamada (Selective Service).</p>

# Barnaamijyada Kaalmada Maaliy

	BARNAAMIJKA	ARDAYDA WAXAY ARJI U QORTAAN	XISAABTA
<b>Barnaamijyada Deynta</b>	<b>Deynta PLUS (PLUS Loan)</b>	Xafiiska kaalmada maaliyadda xerada	Ilaa sicirka tagidda sannadka laga gooyay kaalmada kale ee la qaato
	<b>Deynta SELF (SELF Loan)</b>	Xafiiska Tacliinta Sare Minnesota (Minnesota Office of Higher Education)	Ilaa \$10,000 halkii sanno xagga shahaadada afarta sanno iyo barnaamijyada shahaadada sare (graduate); \$7,500 halkii sanno barnaamijyada xagga barnaamijyada gaaban
<b>Barnaamijyada Dhimista Kharashka Waxbarashada Dibadda ka ah Gobolka iyo Isdhaafsiiga</b>	<b>Kuwa daggan Minnesota ee wax ka barta Wisconsin</b>	Xafiiska Tacliinta Sare Minnesota (Minnesota Office of Higher Education) (si aad u hesho arjiga internetka booqo <a href="http://www.getreadyforcollege.org">www.getreadyforcollege.org</a> ) ama jaamacadda farsamada Wisconsin ee aad dooneysid in aad isku qortid	
	<b>Kuwa daggan Minnesota ee wax ka barta South Dakota</b>	Dugsiga wax laga barto ee ku yaala South Dakota	
	<b>Kuwa daggan Minnesota ee wax ka barta North Dakota</b>	Xafiiska Waxbarashada Sare ee Minnesota (booqo <a href="http://www.getreadyforcollege.org">www.getreadyforcollege.org</a> si aad u heshid arjiga internetka) ama aad si toos ah ula xariirtid kulliyada aad tagtay haddii aad ka soo qalin jebiysay dugsi sare oo ku yaala Minnesota 12dii bilood ee la soo dhaafay.	
	<b>Ardayda Minnesota ee wax ka barta Manitoba</b>	Dugsiga wax laga barto ee ku yaal Manitoba	

## NOOCA LA SIIYO

## ARDAYDA U QALMAYSAA

Kor saar go'an, deynta muddada dheer, waa in dib loo bixiyo

Waalidka ardayda weli ku tiirsan, ardayda shahaadada affarta sano iyo ardayda shahaadada lixda sano ama ardayda barnaamijyada xirfadaha. Waa in uu ahaado muwaadin u dhashay Mareykanka ama ahayn muwaadin balse u qalma. Waa in uusan ku fashalin bixinta ama aan lagu lahayn lacagaha deynta Cutubka IV Sharciga Waxbarashada Sare (Title IV Higher Education Act) ama deeq. Labka waa in ay ka diiwaan gashan yahiiin Adeegga Ciidamada (Selective Service).

Korsaarka isbadbaddala iyo tan go'an, fursadaha amaahda muddada dheer; waa in dib loo bixiyo korsaarka uu bixiyo ardayga saddaxdii bil hal mar inta uu ku sugan yahay dugsiga

Ardayda shahadooyinka hoose (undergraduate), sare (graduate) iyo farsamada ka qaata dugsi ku yaala Minnesota ee xaqa u yeesha ama kuwa daggan Minnesota ee ku qoran dugsi dibadda ka ah gobolka balse xaqa u yeesha. Kafilka u saxiixa waa in uu ahaado muwaadin u dhashay Mareykanka ama in uu ahaado daggane rasmi ah oo lagu kalsoonaan karo.

Ardayda waxay bixiyaan hadba tii badan kharashka waxbarashada dagganaha iyo qadarka ijrada ka jirto hay'adda wax laga barto, ama isku celceliska qadarka laga soo dallaco hay'adaha gobolka ardayga ee la barbar dhiggi karo.

Ku dhawaad dhammaan ardayda jaamacadaha dadweynaha. Waxaa ka reeban ardayda ku jirta Jaamacadda Taqtarnimada, Daweynta Xoolaha iyo Ilkaha ee Jaamacadda Wisconsin-Madison ama Milwaukee.

Ardayda waxay bixiyaan hadba tii badan kharashka waxbarashada dagganaha iyo qadarka ujrada hay'adda wax laga barto ama isku celceliska qadarka laga soo dallaco machadyada gobolka ardayga ee la barbar dhiggi karo.


Ku dhawaad dhamaan kuwa daggan Minnesota ee taga machadyada dadweynaha South Dakota.

Ardayda waxay bixiyaan hadba tii badan qadarka kharashka waxbarashada dagganaha ee hay'adda wax laga barto ama isku celceliska kharashka hay'adaha la barbar dhigi karo ee ka jira gobolka ardayga.

Ku dhawaad dhammaan kuwa daggan Minnesota ee taga machadyada dadweynaha North Dakota. Waxaa ka reeban barnaamijyada xirfadaha sharciga, farmashiyada iyo taqtarnimada.

Ka dhaafidda kharashka waxbarashada kuwa aan dagganeyn ee hay'adaha ka qeybqaata Manitoba

Kuwa daggan Minnesota ee tagga Jaamacadda Manitoba, Jaamacadda Winnipeg, Jaamacadda Brandon, Jaamacadda Bulshada Red River ama Jaamacadda Universitaire de Saint-Boniface.



## Minnesota Office of Higher Education

1450 Energy Park Drive, Suite 350  
Saint Paul, MN 55108-5227

Tel: 651.642.0567 or 800.657.3866  
TTY bedel: 800.627.3529  
Fax: 651.642.0675

E-mail: [info.ohe@state.mn.us](mailto:info.ohe@state.mn.us)

[www.getreadyforcollege.org](http://www.getreadyforcollege.org)  
[www.ohe.state.mn.us](http://www.ohe.state.mn.us)

©2011 Minnesota Office of Higher Education

 Printed on recycled paper.

Dokumentigan waxa dadka leh naafo loo heli karaa isaga  
oo ah qaabab kale haddii la soo waco 651.642.0567.